

Sebteembar
2006

Caafimaadka ilmaha iyo daryeelka ilmaha

Xaashida macluumaadka waalidka,

U gudbida Dugsiga

U diyaarinta ilmahaagu inuu bilaabo dugsiga waa wax xiisa u leh ilmaha iyo adigaba. Waxaan doonaynaa in aan aragno carruurtaayada oo farxaana oo la qabsaday dugsiga, dugsiga oo si fiican lagu bilaabaanaa wuxuu leeyahay faaiido waxbarasho iyo mid bulsho oo muddo dheera. Waalid ahaan, door wanaagsan ayaad ka qaadan kartaa ka caawimida ilmahaagu inuu kalsooni ku bilaabo.

Iyadoo u gudbida dugsiga ay badanaa tahay wax waayaragnimo wadata, xaalladaha qaarkood bilaabida dugsigu waxay noqon kartaa wax male ka fog. Kani waa heer ku cusub adiga iyo ilmahaagaba, laakiin marka ilmahaagu marayo isbedela heerkaan oo badan, adiga waxba iska kaa bedeli maayaan. Waxaad noqon kartaa ilmahaaga buundadiisa markay ka tegayaan guriga oo u gudbayaan daryeelka ilmaha dabadeedna dugsiga uga sii gudbaan.

Kaalmaynta xirfadaha asaasiga ah

Carruurta waxaa laga filayaa inay ahaadaan kuwa madax banaan oo naftooda masuul ka ah marka dugsiga la joogo. Waxaa jira xirfada asaasi ah, kuwaas oo ay ku jiraan lebisashada iyo aadida musqusha iyaga oo aan la caawimin, carruurta waa inay ka adkaadaan waxaas oo dhan ka hor inta aanay bilaabin dugsiga. Xirfadaha khaasatan kuwa bulsho waa muhiim. Sii ilmahaaga fursadaha uu ku dhisto xirfadahaan kuna amaan wixii horumar ah.



U diyaarinta ilmahaaga u gudbida dugsiga

- Kala hadal ilmahaaga wixii ku saabsan dugsiga. Sii ilmahaaga fursadaha uu kuugu weydiiyo su'aallo sida uu rabo iyo waqtiga uu rabo
- La hadal ilmahaaga daryeelihiisa. Ogow barnaamij kasta oo dugsiga oo la xiriira xarakaadyada kana qayb gal
- Khibradahaagii hore iyo tan dugsigaan si hufan uga hadal
- Dugsiga hawlihiisa ka qaybgal – inaad dugsiga door ka qaadato oo aad wax ka ogtahay waa muhiim, ilmahaagu ficilkaas waa qaadanayaa
- Hadday suurtagal tahay, la kulan macalinkaaga
- Ku dhiirgeli ilmahaaga inay muujiyaan dareenkooda iyo fikradooda ayna muujiyaan /weydiiyaan su'aallo markay u baahan yihiin caawimo.

Aqoonta aad u leedahay bay'ada cusub waxay caawintaa in gudbida dugsigu ahaato mid sahlan

- Is bar ilmahaaga iyo carruurta kale ee aadaya isla dugsiga
- Booqo dugsiga xilliyada aan shaqada lagu jirin si ilmahaagu ula qabsado sida dhulku u yaal. Bar isticmaalida tuubada biyaha, ogowna meesha musquluhu ku yaalliin
- Sameeya waxyaallaha dugsiga laga sameeyo, sida xirashada dharka dugsiga, qaadashada boorsada garabka iyo qada kala soo bixida sanduukha. Aadida dibad bax qoys waxay ka caawimi kartaa carruurta inay bartaan xirfadahaan si fan ah oo wax la qabanayo
- Ka dhig waaya-aragnimadaan mid xiisa leh waxtarna samaynaysa.

QAIS – Quality Areas 3 and 4, Principle 2.1

FDCQA – Quality Area 3, Principle 1.3

Xaashidaan xaqiiqada ee waalidka waxaa la hellaa iyadoo ku qoran luqada kala duwan waxaana lagala soo bixi karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah www.ecconnections.com.au

Dadaalka

Waxaa taageeray



SOMALI